

2023-08-28

Fariinta Qoyska Isbuuclaha Dhaqtar Horton

Maya Angelou ee caanta aheyd ayaa tiri, “*Runtii ma ogaan kartid meesha aad u socotid illaa aad ka ogtahay meesha aad ka timid.*” Erayadan xooggan waxay ina xusuusinayaan in hormarka u baahanyahay qiimeyn run ah ee meesha aad joogtid iyo sida aad halkaan ku soo gaartay.

Sida barnaamijkeena *Carqaladeynta Heerka sare* u socdo, waxaan si qoto dheer ah diirada u saarnaa fahamka booskeena hadda, wadada halkaan nakeentay sida wanaagsan ee horay loogu socdo. Taasi waa sida aan si wanaagsan ugu qalabeynsnaaneyno si aan u qaabeyno mustaqbal ifayo ee ardaydeena. Hadafkeena aan la qarin karin waa inaan sare u qaadno waayo aragnimada waxbarashada ee canug walba, taageerida waxbarashadooda, bulsho, dareenka, iyo koriinka jireed.

Dulmarka isbuuca la soo dhaafay: Xubnaha Guddigeena Waxbarashadu waxay laba maalmood u hureen dib u gurasho loogu tallogalay inay xoojiso fahamkeena iyo wada shaqeysteena wadajirka ah. Dib u noqoshadaan waxay na siisay madal wadahadal furan iyo aqbaaraha dhinacyada muhiimka ah ee socdaalkeena. Wuxaan baarnay mowduucyada sida Qorshaha Mastarka Dhameystiran, mashaariicda E-SPLOST, xakameynada maaliyadeed, dib u eegista 30 keyga maalmood ee ugu horeeya sida Kormeeraha guud, iyo wax ka badan.

Qorshaha Mastarka Dhameystiran iyo mashaariicda [E-SPLOST](#) waxay qaadeen heerka dhexe, iyagoo is waafajinayo yoolkeena la wadaago ee lagu hormarinayo xarumaha iyo howlgalada Degmada. Anagoo si gaar ah diirada u saareyna wax ka qabashada caqabadaha buux dhaafka iyo ka faa'ideysiga qaar ka mid ah dugsiyadeena, waxaan ka wada hadalnay xeelado suurtagal ah oo si fiican ugu adeegayo baahiyaha dadyowga ardayda kala duwan.

Sida wakiilo masuulka hantida dadweynaha, waxaan si taxadar leh u qiimeynyna arrimaheena maaliyadeed. Wada shaqeysteena joogtada ah, daacada ah, iskaashiga, iyo u hogaansanaanta Waaxda Hantidhowrka Georgia iyo shuruudaha hay'adahooda ayaa ka tarjumaya u heelanaanteena lagu gaarayo hab dhaqamada maaliyada ee saxda ah.

Markaan dib u milicsado 30-keyga maalmood ee ugu horeeyay ee kormeeraha guud ahaan, waxaan sii wadaa inaan dhiirogeliyo dadaalka aan joogsiga laheyn ee ardaydeena, macalimiinteeena, qoysaska, iyo jaalalka bulshada. [Shahaadooyinka H-PRIDE](#) ee dhawaan la siiyay [Snapfinger Elementary, Columbia Middle](#), iyo [Towers High](#) waa marag macquul ah ee dadaaladeena wadajirka ah ee lagu xoojinayo qiyamyada aasaasiga ee horay u wadayo howlgalkeena.

Si aad u heshid faham badan oo dhameystiran, waxaan kugu casuumayaa inaad sahmisdid ajandaha buuxa adoo riixayo [HALKAAN](#). Ilahaan wuxuu bixinayaa fikrado qoto dheer oo ku saabsan wadahadaladeena iyo bandhigiyadeena.

Inagoo sii wadno safarkan la wadaago, xasuusnow in dadaalkeena wadajirka ah uu u horseedo hormarkeena. Taageeradaada aan kala go'a laheyn waxay awood noo siineysaa inaan u abuurno mustaqbal u ifaya ardaydeena, bulshadeena iyo midba midka kale.